

## Let's Get Reading!

### Waa Maxay Let's Get Reading!?

Let's Get Reading waa barnaamij ay soo qorsheeyeen macalimiinteen-a-maktabadlayaasheena PPS hadafkiisuna yahay in buugaagta daabacan sida ugu dhakhsiyaha badan loo gaadhsiiyo ardayda. Ardayda qaar ayaa laga yaabaa inaysan taaban buugga daabacan wax ka badan lix bilood!

Barnaamijkani wuxuu ku qotomaa sameynta iyo amaaneysiinta arday kasta boorsooyin ka koobaan 5-10 buug kuwaas oo ku heysanayo guriga si uu ula akhriyaan qoysaskooda, asxaabtooda, ama xitaa xayawaanka rabaayadda ah! Waqtii iyo goob la qoondeeyay ayuu qoysku kasoo qaadan doonaa boorsada buugga si ay ugu raaxeystaan, ama xaaladaha qaarkood, boorsada ayaa loo geyn doonaa qoyska. Dhowr toddobaad kadib, qoysasku waxay soo celin doonaan boorsadooda buugga waxayna heli doonaan mid cusub. Nidaamkani wuxuu wareegayaa toddobaad kasta: boorso qaado, soo celi, boorso cusub qaado, soo celi, iyo sidaas oo kale.

Noocyada buugaagta ee boorsooyinka ku jira marka hore way kala duwanaan doonaan, laakiin waqtii kadib ayaa la abuuri karaa si looga jawaabo codsiyada ardayda iyo codsiga macalinka ee ardayga. Boorsooyinka buugaagta maktabadda ayaa ay sidoo kale ku jiri doonaan su'aalo iyo jawaabo ku saabsan hanaanka, liiska Wada-hadal Curiyayaasha, iyo qoraallo is-dhexgal ah oo ku saabsan Noocyada buugaagta si loo dhiirrigeliyo akhrinta. Kuwani waa noocyada buugaagta ee ardaygu ka heli karo boorsada:

#### Fasalada K-2

- Buug akhrin oo heerar leh
- Buuga sawirada oo heer walba leh
- Buug aan khayaali ahayn
- Sheeko sawireed
- Buug cutubeed bilow ah
- Taariikh Nololeed
- Luqadaha adduunka (Buug laba luqadood ah ama buug ku qoran luqad kale)
- Buug kala jaad ah

#### Fasalada 3-5

- Buug khiyaali ah
- Buuga sawirada oo heer walba leh
- Buug aan khayaali ahayn
- Sheeko sawireed
- Buug cutubeed bilow ah
- Taariikh Nololeed
- Luqadaha adduunka (Buug laba luqadood ah ama buug ku qoran luqad kale)
- Buug kala jaad ah

#### Fasalka 6 & Wixii Ka Sareeya

- Buug khiyaali ah
- Buug aan khayaali ahayn
- Sheeko sawireed
- Taariikh Nololeed
- Luqadaha adduunka (Buug laba luqadood ah ama buug ku qoran luqad kale)
- Buug kala jaad ah

Waxaan aqoonsan nahay dhammaan aragtiyada kala duwan, oo ay ku jiraan (laakiinse aan ku xaddidhnayn) LGBTQIA, Dhaladka, dadka midabka leh, kala duwanaanta jinsiga, dadka naafada ah\*, iyo qowmiyadaha, dhaqanada, iyo diimaha laga tirada badan yahay.

– weneeddiversebooks.org

Dugsi kastaa wuxuu dejin doonaa jadwalka qaadashada iyo soo celinta, kaas oo ku habboon ardayda iyo goobta degenaanshaha. Su'aalaha waxaa lagu hagaajin karaa shaqaalaha maktabadda ee dhisme kasta, ama Adeegga Maktabadda ee PPS ee [ppslibraries@pps.net](mailto:ppslibraries@pps.net).

## Let's Get Reading!